



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Telephone:

Re:

I am writing to let you know that I had to suspend your student in order to investigate possible grounds for expulsion. I know that it is a very serious matter for families to learn that their student may be involved in any kind of misconduct. We take your student's welfare very seriously. This letter and the attached documents provide information on the suspension procedures.

The incident occurred on

The behavior(s) that led to the suspension are:

The suspension will begin on _____ and continue until a hearing or meeting can be held. The suspension will last no longer than 10 days.

During the period of suspension, your student may not attend this school, participate in school activities, or enter any other Portland Public School property without the permission of the Principal. Your student is encouraged to ask me for assignments during the suspension.

A notice stating a time, date, and location for an expulsion hearing, will be sent, if needed, by both certified and regular mail to you. I will confirm these arrangements with you by telephone. If an expulsion does not occur, it is District policy that a suspended student may automatically return to school at the end of the assigned suspension period, unless other conditions are pending.

Attached are suspension procedures. If you are unable to read or understand them, please call 503.916.3427 to have someone explain it to you in a language you understand.

Again, the school takes any removal from class time seriously. When students are not in class their educational progress is limited. It is my hope that this process provides a learning opportunity for your student. If you have any questions, concerns or need additional information, please feel free to call me at 503.916.

Sincerely,

Attachment: Suspension Procedures
c: Student's School File, Student Services



DUGSIYADA DADWEYNAHA EE PORTLAND

Telefon:

Tx:

Waxaan kuugu soo qorayaa in aan ku ogeysiyo in ardaygaaga laga joojinayo dugsiga si loo baaro wax suurtagala oo lagu eryo in ay jirto. Waan ogahay in ay tahay arrin aad ugu culus qoysaska in ay ogaadaan in ardaygoodu ku jiray wax anshax xumo ah. Waxaanu si culus u qadarinaa ardaygaaga daryeelkiisa. Waraaqdan iyo dhokomentiyada ku lifaaqan waxay macluumaad ka bixinayaan hababka lagaga joojiyo ilmaha dugsiga.

Dhacdadani waxay dhacday

Dhaqanka keenay joojintu waa:

Joojintu waxay bilaabanaysaa oo ay soconaysaa ilaa dhagaysi ama kulan la qabanayo. Joojitaanku wuxu socdaa in aan ka badnayn 10 maalmood.

Muddada joojinta, ardaygaagu ma tegi karo dugsiga, kamana qayb-qaadan karo dhaqdhaqaaqyada dugsiga, ama ma geli karo meel uu leeyahay Dugsiga Dadweynaha ee Portland haddii aanad ruqsad ka haysan Maamulaha. Aradyagaaga waxa lagu dhiirigelianayaa inuu i weydiisto hawsha dugsiga inta uu ku jiro ka joojinta.

Ogeysiis sheegaya waqtiga, taariikhda iyo meesha lagu qabanaya dhagaysiga eriga (cayrinta) ayaa laguugu soo diri doonaa haddii loo baahdo boostada caadiga iyo ta sajiilan labadaba. Telfoon ayaan kuugu xaqiijin doonaa qabanqaabadaas. Haddii uu eryis (cayris) dhici waayo, waa siyaasdda Degmada in ilmaha laga joojiyey dugsigu si toosa ugu noqdo dugsiga marka ay dhamaato muddadii loo cayimay in laga joojiyo, haddii aanay jirin xaalado kale oo aan weli la xalin.

Halkan waxa ku lifaaqan hababka eryinta (cayriska). Haddii aad awoodi weydo in aad akhrido ama fahamto, fadlan wac 503.916.3427 si aad u hesho qof kuugu sharxa luqadda aad fahamto.

Mar kale, dugsigu wuxu si culus u arkaa waqtiga ka-maqaashaha fasalka. Marka ardaydu aanay fasalka joogin horumarkooda waxbarsho waa xadidan tahay. Waxay rajadaydu tahay in ay hawshan socotaa u noqoto fursad uu wax ku barato ardaygaagu. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, welwel ama aad u baahan tahay macluumaad dheeraada, fadlan si xora iiga soo wac

Si daacadnimo leh,

Lifaaqa: Hababka Eryinta (Cayriska)

c: Faylka Dugsiga ee Ardayga, Student Services, Agaasimaha Jiidda

	English	Somali
207	Abusive Profane Language	Af Xumo Xadguduba
312	Arson	Kas-u-gubid
511	Assault	Weerar
310	Attempted Arson	Isku-dayid Kas-u-gubid
516	Battery	Garaacis
309	Bomb Threat	Hanjabaad Bambo (Bam)
311	Burglary	Guri-jabsi
501	Bullying/Harassment/Hazing	Foorjo/Waxyeeelayn/Tashwiish
104	Class Cutting	Goysmada Casharka
301	Deliberate Misuse of Property	Si-xun U-isticmaalid Hanti
513	Display of Patently Offensive Material	Muujiin Wax Gef Ah
202	Disruptive Conduct	Anshax Gurraacan
508	Extortion	Baad
308	False Fire Alarm	Digniin Dab Beena
504	Fighting	Dirir
209	Forgery	Been-abuur
303	Gambling	Khamaar
210	Gang Member Identifier	Tilmaamid Xub Budhcad
201	Inappropriate Dress	Dhar Aan Haboonayn
203	Indecent Gesture/Exposure	Calaamad/Ismuujin Anshax Xun
204	Insubordination	Amar-diidis
208	Interference with School Personnel	Farogelin Shaqaalaha Dugsiga
503	Intimidation	Yasid
102	Loitering	Warwareeg
307	Major Theft	Tuugo Weyn
306	Major Vandalism	Kharribaad Weyn
304	Minor Theft	Tuugo Yar
302	Minor Vandalism	Kharribaad Yar
103	Off Limits	Xad Dhaaf
205	Open Defiance	Diidmo-cad
600	Plagiarism/Cheating	Qishid?Khayaano
507	Possession of a Weapon	Haysasho Hub
305	Possession of Stolen Property	Haysasho Alaab La Xaday
505	Possession/Use of Fire Crackers/Explosives	Haysasho/Adeegsi Rash/Wax Qarxa
401	Possession/Use of Tobacco	Haysasho/Isticmaal Tubaako
514	Reckless Vehicle Use	U-adeegsi Baabuur Si-xun
510	Robbery	Dhac
502	Sexual Harassment	Dhibaatayn Galmo La-xiriirta
101	Tardiness	Daahitaan
515	Threat of Violence	Hanjabaad Xoog
509	Threat with a Weapon/Dangerous Instrument	Hanjabaad Hub Wata/Shay Halisa
106	Trespassing	Gelid Sharci Darro
105	Truancy	Goysmo Dugsi
512	Use of a Weapon	Adeegsi Hub
206	Willful Disobedience	Dhago-adayg Ulakasa

NIDAAMKA XANIBAADDA

Arimaha soo socdaa waxa ay qaadaa dhigayaan dariiqadda xanibaadda iyo eryidda ee Dugsiyadda Guud ee Portland, waxaa laga soo xigtay Fulinta Hab-maamulka Dugsiyadda Degmadda ee Dariiqadda Xayiraadda iyo Eryidda. Si aad u aragto Fulinta Hab-maamulka booqo shabakadda caalamiga ah iyo xidhiidhka xagga hoose ku lingaxan. http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.021_ADSuspensionExpulsionFinal_4.9.10.pdf

Xanibaadu waxa ay sii ku meel gaadh ah ugu diidaysaa ardayga xuqa uu uleeyahay in uu xaadiro dugsiga, ama fasalka iyo howlaha dugsiga, mudo (10)cisho oo xidhiidh ah marka laga reebo sida xagga hoose lagu qoray.

Nidaamka Guud: Goorta ardaygu la yimaado waxaa dhici karta in la xanibo, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray waxay:

- Waxay raaci doonaan nidaamka asaasiga ah ee duwidda anshaxa.
 - Hubinayaan iyagga oo adeegsanaya baadhitaan
 - Cadaynayaan hadii ardaygu lahaa dabci la saanqaadaya qorsha 504, ama waxbarashadda gaadhka ah, iyadii oo hadii ay sidaa tahay la raacay.
 - Tixgelinayaan hadii marar hore lagu talaabsaday falal lagu eedeeyey.
- Reference [4.30.020-AD](#).
- Hubinayaan in xanibaadu ay ku haboontahay iyadii oo ka dhigan edbin dembiilaha ta tuhmay.
 - Qabanayaan fadhi xanibaad oo aan caadi ahayn oo ay la yeeshaan ardayga si loogu wargeliyaan tuhunka lagu eedeeyey luqad uu fahmi karo islamarkaana siinayaan ardayga fursad uu isku daafici karo/karto kuna sheegi karto sida ay arintu tahay dhinaceeda. Maamulaha ama howlwadeenka loo idmaday ayaa go'aan ka gaadhi doona talaabadda anshax ee ku haboon, waxaa kale oo uu tixgelin siin karaa xanibaad dugsiga dhexdiisa ah hadii qalabka iyo holwadeenno qabatimi kara la helayo
 - Iyagii oo ruuxsan ay ku dadaalayaan wargelinta waalidka/hagaha iyadii oo qoraal ah luqad ay waalidka iyo ardayguba fahmayaan, marka lagu daro xaaladaha dib-dhigidda iyo nidaamka rafcaanka, hadii ardayga lagu xannibo dibada ama gudaha dugsiga. Waa in lala xidhiidha waalidka/hagaha ka hor inta aan arday dugsiga dhexe, hoose ama itaaldaran loo dirin aqalka.
 - Siinayaan shaqo guri marka laga codsado ardayda lagu xanibay dibadda dugsiga, sii loo hubiyo in ay waxbarashadooda sii joogteeyaan. Ardayga la xanibay waxaa laga filayaa in uu kasoo shaqeeyo shaqadda guri ee la siiyey inta uu ku jiro xanibaadda. Markii ay codsadaan Ardayda waa in loo sheegaa waajibaadka inta ay ku jiraan xiliga xanibaadda. Ardayda waa in la siiyaa waajibaad, mashaariic, ama imtixaanaad ay ku kabaan intii ay ka maqnaayeen dugsiga oo keliya markii ay tahay howlahaasi kuwa ay ku helayaan dhibco. Macalimiintu kuma qasbana in ay ku bixiyaan waqti si ay ola shaqeeyaan oo ugu diyaariyaan waajibaad arday aan habdhaqan wanaagsanayn.

Goorta Xanibaadi Hirgasho: Ardayga lagu xannibo dugsiga ama dibadda dugsiga waxa ay xanibaadaasi hirgalaysaa kadib marka fadhi aan rasmi ahayn la qabto islamarkaana waalidka/hagaha lagu wargeliyey ama gabagabadda dugsiga.

Dib-ugu-noqoshadda dugsiga: La kulanka waalidka/hagaha waa in la qabtaa ka hor inta uusan ardaygu kusoo laaban dugsiga kadib xiligii xanibaada si loogu hel xal eedayntii islamarkaana loo ogaado dariiqad lagu saxartiri karo dabciga ardayga. Waalidka/hagahu waxay codsan karaan la kulanka maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray si loo hal-abuuro qorshe lagu talaabsado si looga badbaadiyo ardayga dhacdo kale oo uu ku talaabsado

Xanibaadda Degdega ah

Marka ay jirto xaalad caafimaad ama badbaadin degdeg ah islamarkaana ay qasab noqoto in ardayga laga saaro bii'adda waxbarasho, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray waa in ay wargeliyaan waalidka/hagaha. Kulan aan rasmi ahayn oo la qabto ayaa loo dib dhigi kara illaa (3)cisho oo maalmaha shaqadda ah.

Ka dagaalanka Xanibaadda: Aradyga ama waalidka/hagaha way ka doodi karaan xanibaadda, ugu horaynba waxay codsanayaan kulan ay la qaataan maamulaha, hadii uusan maamuluhu horay ubixin go'aanka xanibaadda, kadibna waxay codsanayaan in mas'uulka degmadda u qaabilsan kormeerka dugsiga ardaygu dhigto uu dib-u-eegid ku sameeyo, kani waa heerka ugu dambeeyo ee dib-u-eegidda xanibaadda.